Faallo Kooban 11

# Falanqeyn isbarbardhig ah ee Hindise-sharciyeedyada Dembiyada Jinsiga ee Soomaaliya

Janaayo 2021

## Soo koobid

Muran ayaa ka taagnaa u sameynta sharci cusub Soomaaliya oo wax looga qabanayo dembiyada galmada, xilli dhacdooyinka kufsiga iyo xadgudubyada kale ee galmada ay noqdeen kuwo aad u baahsan. Laba hindise-sharciyeed oo kala duwan oo ku saabsan dembiyada galmada ayey diyaariyeen xafiisyo kala duwan. Nuxurka iyo saameynta nindise-sharciyeed kasta si fiican looguma sharrixin dadweynaha, taasoo horseedday xiisado ku qotama jahwareer iyo fahan-xumo halkii ay habooneyd dood xog-ogaalnimo ku dhisan in laga yeesho.

Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqul Insaanka oo dhinac ah, iyo Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo dhinaca kale ah, waxay soo saareen laba hindise-sharciyeed oo kala duwan oo diiradda saaraya dembiyada galmada. Hindise-sharciyeedka asalka ah oo lagu magacaabo Hindise-sharciyeedka Dembiyada Jinsiga ee 2018, waxaa soo saaray Golaha Fulinta waxaana ansixiyay Golaha Wasiirada sanadkii 2018. Hindise-sharciyeedka waxaa lasoo diyaariyey kadib shan sano oo wadatashiyo ballaaran lala yeeshay haweenka, bulshada rayidka, hoggaamiyaasha diinta, iyo beesha caalamka. Hindise-sharciyeedkaas waxaa diidey Baarlamaanka 8-dii Ogosto 2020, markuu soo gudbiyey hindise-sharciyeed cusub loona yaqaan Hindise-sharciyeedka Galmada iyo Dembiyada La Xiriira 2020. Hindise-sharciyeedyadaas waxay leeyihiin kala duwanaanshiyo muhiim ah, oo ay kamid yihiin: sida mid kastaa u qeexo kufsiga; xukun soo jeedinta; heerka faahfaahin ee xuquuqda dhibanayaasha iyo eedeysanayaasha; hannaanka baaritaanka; iyo doorka hay'adaha baaritaanka kala duwan.

Qoraalkan wuxuu qeexayaa waxa ku qoran hindise-sharciyeed kasta wuxuuna soo bandhigayaa isbarbardhigyada iyo kala duwanaanshiyaha muhiimka ah. Qormadu waxey ku talineysaa in la is waafajiyo labada hindise-sharciyeed, in la sameeyo wacyigelin ballaaran oo ku saabsan sharciga lagu taliyey, in sharciga la waafajiyo Xeerka Ciqaabta Soomaaliya, lana xoojiyo garsoorka, booliska, iyo hay'adaha dacwad-oogista.

## Ku saabsan Somali Public Agenda

Somali Public Agenda (SPA) waa hay 'ad aan macaash doon ahayn oo ka shaqeysa cilmibaarista arrimaha jaangoynta iyo maareynta siyaasadaha dalka xarunteeduna tahay magaalada Muqdisho. Ujeedka hay'adda waa hagaajinta maamulka dowliga ah iyo horumarinta adeegyada dowladda ee Soomaaliya iyadoo loo marayo cimibaaris iyo falanqeyn aqoon ku dhisan.

www.somalipublicagenda.org

© 2021 Somali Public Agenda

## Hordhac

Wax-ka-beddello taxane ah oo lagu sameeyay Hindise-sharciyeedka Dembiyada Jinsiga 2018 – kaasoo la hor keenay baarlamaanka federaalka bishii Ogosto 2020 iyadoo laga dhigay hindise-sharciyeed cusub oo baarlamaaneed cinwaankiisuna yahay Hindise-sharciyeedka Galmada iyo Dembiyada La Xiriira – waxay noqotay mowduuc keenay muran badan iyo jahwareer dadweyne. Hoggaamiyeyaasha haweenka iyo qaar kamid ah bulshada rayidka ayaa sheegay in hindise-sharciyeedka cusub uu wiiqaayo ilaalinta sharci ee haweenka iyo gabdhaha ee kufsiga, xadgudubka galmada iyo jinsiga la xiriira, wuxuuna dhiirrigelinayaa guurka caruurta. Waxay sheegeen in qodobbada qaarkood ay ka hor imaanayaan dastuurka federaalka Soomaaliya iyo sharciga caalamiga ee xuquuqda aadanaha.

Hadal-heynta bulshada ee arrintan ku saabsan ayaa ahayd mid aad u kacsan. Dad badan, gaar ahaan baraha bulshada, waxay ku andacoodeen in Hindise-sharciyeedka Dembiyada Jinsiga ee asalka ah uu sii dhiirigelinayo anshax xumada iyo khaniisnimada. Waxay si gaar ah u tilmaameen qodobka 4-aad ee hindise-sharciyeedka oo dhahaya: kufsigu wuxuu dhacaa marka qof (i) *si ula kac ah u geliyo wax kasta ee la geliyo daloolka xubinta taranka, futada, ama xubinta taranka ee qof kale; (ii) qofka kale uusan oggoleyn wax gelinta*. Waxaa weli jira fahan-xumo badan iyadoo la ogsoon yahay in waxyaabaha ku jira labada hindise-sharciyeed aanan si weyn loola wadaagin bulshada. Intaas waxaa dheer, Soomaaliya waxaa kusoo kordhay walaac ku saabsan xadgudubyada galmada sharciguna wuxuu saameyn weyn ku yeelan doonaa jiheynta bulshada ee mustaqbalka. Falanqeyntan ayaa looga gol-leeyahay in si cad loogu sharraxo arrimaha ugu muhiinsan ee ku jira labada hindise-sharciyeed.

## Hindise-sharciyeedka Dembiyada Jinsiga 2018

Hindise-sharciyeedka Dembiyada Jinsiga waxaa loo gudbiyay Golaha Wasiirada bartamihii sanadkii 2017-ka waxaana soo gudbisay Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqul Insaanka ee Dowladda Federaalka. Golaha wasiiradu waxay ansixiyeen sharciga bishii May 2018. Hindise sharciyeedka waxaa loo gudbiyay Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, laakiin marnaba lama horkeenin baarlamaanka sidaas darteedna lagama doodin lamana ansixin.

Guddoomiyaha Golaha Shacabka, Maxamed Mursal, wuxuu baarlamaanka ka sheegay bishii Sebteembar 2020 in guddi baarlamaani ah oo ay wehliyaan culimada diinta iyo garyaqaannada Soomaaliyeed ay dib u eegeen oo ay saxeen hindise-sharciyeedkii asalka ahaa wuxuuna ugu baaqay Wasiirka Haweenka iyo Xuquuqul Insaanka inay dib ugu celiso una gudbiso hindise-sharciyeedka Golaha Wasiirada si ay u ansixiyaan. Wuxuu intaas ku daray in guddiga joogtada ah ee Golaha Shacabka ay shireen ayna soo jeediyeen in ay hormuud ka noqdaan dib-u-habeynta sharciga si loosoo bandhigo hindise-sharciyeed cusub. Gudoomiyaha ayaa sidoo kale sheegay inuu kala hadlay mowduucan Raiisul wasaarihii hore Xasan Cali Khayre oo usoo jeediyay in baarlamanka ay go'aansan karaan masiirka hindise-sharciyeedkan. Hindise-sharciyeedka cusub waxaa la horgeeyay Baarlamaanka si ay uga doodaan Ogosto 2020, taasoo macnaheedu yahay in Baarlamaanku doortay inuu beddelo Hindise-sharciyeedka Dembiyada Jinsiga.

Hindise-sharciyeedkii asalka ahaa ee Dembiyada Jinsiga 2018 oo ay soo diyaarisay Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqul Insaanka ayna ansixiyeen Golaha Wasiiradu wuxuu ka kooban yahay **9** qeybood iyo **63** qodob:

1. Qeybta koowaad (qodobada 1-3) waxay qeexeysaa ereyada loo adeegsaday hindise-sharciyeedka.
2. Qeybta labaad (qodobada 4-20) waxay ka hadleysaa noocyada kala duwan ee dembiyada galmada.
3. Qeybta saddexaad (qodobada 21-34) waxay qeexeysaa dembiyada galmada ee ka dhanka ah carruurta.
4. Qeybta afaraad (qodobada 35) waxey qeexeysaa ku xadgudubka awoodaha.
5. Qeybta shanaad (qodobada 36-53) waxay ka hadleysaa baaritaannada iyo kaalinta hay'adaha kala duwan ee howlaha baaritaanka.
6. Qeybta lixaad (qodobada 54-58) waxay qeexeysaa ciqaabta dembi kasta oo galmo ah.
7. Qeybta toddobaad (qodobka 59) waxay tilmaameysaa diiwaan-geliyaha dembiilayada galmada.
8. Qeybta siddeedaad (qodabada 60-61) waxay qeexeysaa hirgelinta hindise-sharciyeedka dembiyada jinsiga.
9. Qeybta u dambeysa (qodabada 62-63) waxay soo gebagabeynayaa hindise-sharciyeedka waxana looga hadlay habka loo beddeli karo sharciga.

## Qodobbada muhiimka ah ee Hindise-sharciyeedka Dembiyada Jinsiga 2018

### Dembiyada Galmada

Qaar kamid ah dembiyada galmada ee hindise-sharciyeedka uu ka hadlaayo waxaa ku jira kufsi, xadgudubka galmada, guurka qasabka ah, afduubka galmada iyo dhibaateynta galmada. Qodobka 4-aad wuxuu qeexayaa kufsiga inuu dhacayo marka qof (i) si ula kac ah u geliyo, wax kasta oo la geliyo daloolka xubinta taranka, futada, ama xubinta taranka ee qof kale; (ii) qofka kale uusan oggoleyn wax gelinta. Qeexitaankan ayaa waxaa uu dood kulul ka dhex abuuray Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, iyo sidoo kale qeybaha bulshada. Qododkaan, madmadowgiisa awgeed, wuxuu ka hadlay arrimo xasaasi ah oo ay kamid yihiin:

1. Qeexitaanka wuxuu soo jeedinaya in sidoo kale dumarka ay geysan karaan dembiga kufsiga maadaama uu sheegaayo “qof walba” (oo ka dhigan dhammaan jinsiga – lab iyo dheddigba)

2. Shuruuda keliya ee loo baahan yahay si fal galmo loogu aqoonsado kufsi, marka loo eego qeexitaanka, waa oggolaansho la’aan ka timaada qofka kale. Tani waxaa ay ku fasireen culimada diinta in loola jeedo in sharcigu oggol yahay ama uu dhiirigelinaayo galmada dadka aan isguursan. Afhayeenka golaha shacabka ayaa ka akhriyay qodobkaan kalfadhigii Golaha Shacabka ee bishii Sebtember 2020. Wuxuu si adag u diiday sharciga wuxuuna sheegay inuu ka hor imaanayo diinta Islaamka iyo dhaqanka Soomaaliyeed.

Sidoo kale, Qodobka 5-aad wuxuu kaloo ka hadlayaa kufsi wadareed. Waxaa uu sheegayaa in qof uu ku kacayo fal kufsi wadareed ah haddii uu a) sameeyo fal kufsi, iyo b) uu kamid noqdo koox si wada jir ah kufsi u sameysa.

Qodobada 4-aad iyo 5-aad waxay tilmaamayaan ciqaabta kufsiga iyo isku dayga kufsiga. Qof kasta oo kufsi ama kufsi wadareed geysta waa in lagu xukumaa 10 ilaa 15 sano oo xarig ah. Isku day kufsi ama kufsi kooxeed/wadareed waxaa lagu ciqaabayaa 7 ilaa 10 sano oo xarig ah.

Hindise-sharciyeedka ayaa sidoo kale ka hadlaya ka faa’ideysi jinsiyeed. Sida uu qeexaayo qodobka 8-aad, ka faa’ideysi jinsi waxaa uu dhacayaa haddii qofka lala sameeyo galmo iyadoo la adeegsanayo:

a) Hanjabaad, xoog, ama weerar;
b) Ka faa'iideysiga duruufaha qasbaya;
c) Ka heysashada aqoonsiga ama dukumintiyada safarka ee qofka;
d) Dalbashada bixinta lacag aan sharci ahayn;
e) Ku qasbidda inay qabtaan shaqo lid ku ah rabitaankiisa/ rabitaankeeda; ama
f) Adeegsiga culeys ama awood kale oo jireed ama maskaxeed.

Arimaha ku xusan Qodobka 8-aad waa kuwo ka jira Soomaaliya. Gabdhaha qaar waxaa laga yaabaa inay u nugul yihiin xadgudubka duruufaha jira awgood. Haweenka qaar ayaa ka cawday in galmo looga faa’iideysto marka ay shaqo raadiyaan ama shaqada looga bedesho galmo. Hindise-sharciyeedkan ayaa mamnuucaya xadgudubka ama ka faa'iideysiga noocaas ah. Qodobka 8-aad wuxuu soo jeedinayaa in qof kasta oo sameeya ka faa’ideysi galmo in lagu ciqaabo xabsi 5 ilaa 12 sano ah. Sidoo kale, qodobku wuxuu soo jeedinayaa xabsi 5 ilaa 7 sano oo ah haddii uu qof isku dayo inuu ku kaco dembi noocaan oo kale ah.

Mid kamid ah dembiyada galmada ee sharcigu ka hadlayo waa guurka qasabka ah. Qodobka 12-aad wuxuu sheegayaa in qof kasta oo guursada qof kale oggolaansho la’aan uu galayo dambiga guurka khasabka ah. Intaa waxaa dheer, sharcigu wuxuu dambi ka dhigayaa fududeynta iyo abaabulka guurka qasabka ah (Qodobka 12 [2]) iyadoo aan oggolaansho laga helin labada dhinac midkood. Qodobka ma bixinayo faahfaahin ku filan oo lagu kala saaro gabadha aan weli la guursan ama gabadha horey loosoo guursadey oo aan la qabin iyo haweeneyda laga dhintay ama la furay. Tani waa mid kamid ah xaaladaha ay muhiimka tahay iswaafaqsanaanta sharciga madaniga iyo Shareecada Islaamka. Shareecada Islaamku waxay u oggoshahay aabbaha inuu gabadhiisa u guuriyo nin xaaladaha qaarkood. Tusaale ahaan, haddii aabuhu la wadaago gabadhiisa go'aankiisa ah inuu u guuriyo nin, iyadana ay aamusto, aamusnaantan waxaa loo qaadanayaa inay tahay oggolaansho. Haddii ay si cad u diiddo, shareecadu uma oggolaaneyso aabaha in uu u guuriyo gabadha nin aysan rabin. Si kastaba ha ahaatee, guurka haweenka la furay ama dumarka laga dhintay, Shareecada waxay u baahan tahay oggolaanshahooda oo hadal ah oo cad.

Guurka khasabka ah waa wax aad uga dhaca Soomaaliya, gabdhaha ayaana ah inta badan dhibanayaasha. Gabdhaha mararka qaar way aqbalaan guurka iyagoo ka baqaya "habaar" ka yimaada waalidkood. Inkastoo qodobka 12-aad uusan kala soocin dumarka aan guursan ama kuwa la furay/laga dhintay, haddana waxaa uu soo jeedinayaa xabsi 5 ilaa 7 sano ah oo noqoneysa ciqaabta fududeynta ama diyaarinta guurka khasabka ah. Iskuday ah in la sameeyo guur khasab ah, waxaa lagu muteysanayaa xabsi 2 ilaa 3 sano ah.

Hindise-sharciyeedkan ayaa sidoo kale u aqoonsanaya afduub galmo in uu yahay dembi galmo, taasoo lagu qeexay afduub ula kac ah ama afduub ama haysasho qof kale si loogu galmoodo. Ciqaabta ficillada noocaas ah waa xarig 5 ilaa 7 sano ah. Iskudayga dambi noocaas ah ayaa waxaa ka dhalanaya xukun ah 3 ilaa 5 sano oo xarig ah. Afduubka carruurta ayaa kusoo badanayay Soomaaliya, gaar ahaan magaalada Muqdisho xilliyadii dambe. Inkastoo aysan jirin caddeyn muujineysa in dadkaan, oo u badan carruur, loo afduubay ujeeddooyin galmo, haddana waxay noqdeen kuwo u nugul xadgudubyo ay kamid yihiin dembiyada galmada.

Qodobbada 17, 18, 19, iyo 20 waxay ka hadlayaan dembiyada galmada ee la xiriira tikniyoolajiyadda iyo baraha bulshada. Sida ku cad Qodobka 17-aad, duubista, wadaagida, ama faafinta sawirada iyo muuqaallada anshax xumada ah waxaa lagu muteysanayaa ciqaab ah xabsi 2 ilaa 5 sano ah. Qodobka 18-aad wuxuu qeexayaa soo bandhigista muuqaalo anshax xumo ah, taasoo sababeysa xabsi 5 ilaa 7 sano ah. Ka ganacsiga iyo qeybinta qalabka ama aaladda galmada (Qodobka 19-aad) ayaa ah iyadana mid ciqaab 3 ilaa 7 sano oo xarig ah lagu muteysanayo. Iibsashada ama lahaanshaha muuqaalo ama sawirro galmo (Qodobka 20-aad) sidoo kale waa mid mamnuuc ah, laguna muteysanayo xabsi 1-2 sano oo xariq ah.

Inkastoo dambiyada galmada ee ku xusan qodobbada 17-aad ilaa 20-aad aysan aad ugu faafin Soomaaliya (marka loo fiiriyo heerarka caalamiga ah), dambiyada noocan oo kale ah ayaa sii kordhaya sababo la xiriira tirada sii kordheysa ee dadka Soomaaliyeed ee isticmaala baraha bulshada iyo helitaanka internetka oo soo hagaagaya. Tusaale ahaan, shaqsiyaad ayaa lagu yaqaanaa inay duubaan codad ama muqaalo islamarkaana ay ku rakaateeyaan qofka laga duubay muuqaalka ama codka lacag ama dano galmo, iyagoo ugu hanjabaya inay sii faafin doonaan waxyaabaha la duubey.

Dembiyada kale ee galmada ee lagu xusey hindise-sharciyeedkan waxaa kamid ah addoonsi galmo (Qodobka 9-aad), dalxiis galmo (Qodobka 10-aad), maandoorin ula kac ah (Qodobka 14-aad), daandaansi jinsiyeed (Qodobka 13-aad), iyo xarig ama heysasho sharci darro ah oo loogu talagalay ujeedooyin galmo iyo addoonsi (Qodobka 16-aad).

### Dembiyada galmada ee ka dhanka ah carruurta

Qodobka 21-aad wuxuu sheegayaa in kufsiga canug uu dhaco markii qof si ula kac ah u geliyo xubinta taranka ragga meel kasta oo ka mid ah jirka caruurta, ama daloolka xubinta taranka ee qof kale. Qofka ku kacay falkaan waxaa lagu xukumi karaa xabsi daa'in hadii dhibbanaha uu yahay cunug ka yar 11 sano. Xukunka wuxuu noqonayaa 15-25 sano oo xarig ah hadii dhibanaha uu yahay canug da'diisu u dhaxeyso 16 ilaa 18 sano. Sidoo kale, kufsi wadareed loo geysto ilmo (Qodobka 22-aad) wuxuu sababi karaa xabsi daa’in.

Hindise-sharciyeedka ayaa sidoo kale qeexaya guurka carruurta inuu yahay dembi galmo. Sida ku xusan Qodobka 25-aad, qofku wuxuu galayaa ficil guur caruur haddii: (a) ay si ula kac ah u diyaarinayaan guur cunug, iyo (b) labada dhinac ee is guursanaya uu midkood yahay ilmo. Xukunka guurka caruurta waa 10-15 sano oo xarig ah. Sikastaba ha noqotee, qodobkan ma sharraxayo qofka la dhihi karo waa ilmo marka xaaladdan la joogo. Qaangaarnimada iyo carruurnimada si cad looma qeexin Soomaaliya waana ereyo inta baddan siyaabo kal duwan loo fasiro.

Qodobka 21-aad wuxuu qeexayaa kufsiga ilmaha ka yar 11 sano. Ma cadda haddii ay taasi tusinayso in kuwa ka weyn 11 jir aysan carruur ahayn. Dhammaan dembiyada kale ee galmada ee ka dhanka ah dadka waaweyn waxaa lagu sharraxay dembiyada galmada ee ka dhanka ah carruurta qeybta ka hadleysa caruurta ee hindise-sharciyeedka. Farqiga keliya ayaa ah in ciqaabtu ay ka sarreyso marka la barbar dhigo dembiyada galmada ee dadka waaweyn

### Baaritaannada iyo cadaymaha dambiyada ciqaabta

Baaritaannada la xiriira dembiyada galmada waxaa lagu faahfaahiyey Qodobbada 36-53. Hindise-sharciyeedka ayaa qeexaya doorka iyo waajibaadka ciidanka booliska (Qodobka 37-aad), xafiiska xeer ilaaliyaha guud (qodobada 38-39-aad), iyo habraaca garsoorka maxkamadaha sida maxkamada madaniga ah (qodobka 41-aad), helidda

garsoorka dalka (Qodobka 42-aad), iyo helitaanka cadaalad dalka dibadiisa ah (Qodobka 43-aad). Intaas waxaa dheer, waxaa jira faahfaahin ku saabsan xuquuqda dhibbanayaasha iyo markhaatiyada sida xuquuqda daryeelka caafimaadka oo bilaash ah (Qodobka 44-aad), xuquuqda asturnaanta (Qodobka 45-aad), xuquuqda carruurta (Qodobka 46-aad), xuquuqda guud, iyo tallaabooyinka kale ee helitaanka caawinaad (Qodobka 47-aad), xuquuqda dadka naafada ah (Qodobka 48-aad), xuquuqda ka badbaadayaasha ka ganacsiga tahriibinta ujeedooyin jinsi leh (Qodobka 49-aad), iyo xaq u lahaanshaha billaabida dacwada madaniga ah (Qodobka 50-aad).

Qeybta baaritaanka iyo xuquuqda sidoo kale waxay si cad u qeexaysaa xuquuqda eedaysanaha (Qodobka 51-aad). Muhiimad ahaan, waxay qeexaysaa cadeymaha la adeegsan karo (Qodobka 52-aad) iyo cadeymaha aan la adeegsan karin (Qodobka 53-aad).

## Hindise-sharciyeedka Baarlamaanka ee Dembiyada la xiriira Galmada 2020

### Guudmar guud ee Hindise-sharciyeedka

Hindise-sharciyeedkan ku saabsan dambiyada galmada waxaa soo diyaariyay Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. Waxa uu ka kooban yahay 6 qeybood iyo 39 qodob. Qeybaha soo socdaa waa dulmar guud oo hindise-sharciyeedka ah:

1. Qeybta koowaad (Qodobbada 1-6) waxaa lagu qeexayaa eraybixinta iyo macnaha galmada iyo sidoo kale ujeeddada hindise-sharciyeedka.
2. Qeybta labaad (Qodobbada 7-26) waxaa looga hadlayaa dembiyada galmada sida xadgudubka galmada, kufsiga (isku day kufsi, iyo kufsi kooxeed), addoonsiga galmada, dhibaataynta galmada, guurka khasabka ah, iyo guurka carruurta.
3. Qeybta saddexaad (Qodobbada 27-29) waxaa lagu qeexayaa baaritaannada dambiyada ka dhanka ah dadka nugul, ilaalinta iyo ka warbixinta dadka nugul.
4. Qeybta afaraad (Qodobbada 30-34) waxaa lagu qeexayaa xuquuqda dhinacyada, sida xuquuqda dadka nugul, dhibbanayaasha, xuquuqda eedaysanaha, iyo xuquuqda madaniga ah.
5. Qeybta shanaad (Qodobbada 35-37) waxay ka hadlaysaa baaritaanka iyo caddaynta dembiyada ciqaabta.
6. Qeybta ugu dambaysa (Qodobbada 38-39) waxay qeexaysaa qorshaha qaran ee kiisaska kufsiga iyo ku dhaqanka sharciga.

### Qodobbada ugu muhiimsan ee hindise-sharciyeedka baarlamaanka

### Dembiyada galmada

Qodobbada 8-10 waxay ka hadlayaan kufsiga. Qodobka 8-aad wuxuu sheegayaa in qof kasta oo isku daya fal kufsi inuu dambi galay ayna mudan tahay in lagu ciqaabo sida uu qabo Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed. Sida ku cad Qodobka 9-aad, kufsigu waa ficil galmo oo uu qof kula kaco qof kale, oggolaansho la'aan. Sida ku xusan qodobka 9 (2), kufsigu waa ficil toos ah oo ula kac anshax xumo galmo ah, taasoo dhacda marka labo xubnood oo kala jinsi ah ay galmoodaan ama marka xubinta galmada ee labka la geliyo xubinta taranka ee dheddiga. Qof kasta oo gala dambigaas waxaa lagu ciqaabayaa si waafaqsan shareecada Islaamka.

Xukunka kufsiga ee ku xusan hindise-sharciyeedkan lama caddeyn. Qodobka wuxuu sheegayaa keliya in ciqaabta la kordhin doono haddii dhibanaha kufsiga uusan fayoobayn, naafo yahay / nugul yahay, ama yahay cunug. Intaa waxaa dheer, yaa noqonaya canug xaaladdan ma cadda. Qaangaarka jirka badanaa way ku kala duwan yihiin dadka. Hadduu qofku 15 jir yahay ama ka yar yahay laakiin uu jir ahaan qaangaaray, qofkaasi weli ma yahay caruur? Kuwani waa qaar kamid ah su'aalaha farsamo ee qodobkan uusan faahfaahin.

Qodobka 10-aad wuxuu ka hadlayaa kufsi-wadareed. Tani waxay dhacdaa markii labo qofood ama ka badan ay si wada jir ah u galaan fal kufsi ah oo ay u geystaan hal qof ama ka badan, iyagoo adeegsanaya xoog, hub, ama ciqaab. Qodobkan wuxuu qeexayaa in ciqaabta koox kufsi geysatay ay sii kordheyso haddii kufsiga loo geysto qof nugul sida cunug, qof waalan, ama qof baahi gaar ah qaba. Waxay intaas kudareysaa in ciqaabta ay sidoo kale kordhi doonto hadii kufsiga uu sababo infekshinka HIV / AIDS.

Qodobka 18-aad wuxuu ku qeexayaa inuu yahay fal dambiyeed galmo marka qofku ku khasbo qof kale guur iyadoo uusan ka warqabin qoyskiisa ama qoyskeeda. Hindise-sharciyeedka ayaa sheegaya in dadka noocaas ah ay mari doonaan ciqaabta ay kusoo rogeen shareecada Islaamka iyo Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed ee guurka khasabka ah. Sidoo kale, qofka ku caawiya qof kale guurka khasabka ah wuxuu galayaa dambi ah inuu ku xadgudbay xuquuqda (iyo inuu dambi ka galay) qofka la khasbay.

Hindise-sharciyeedku wuxuu sharraxaad guud ka bixinayaa arrimaha la xiriira guurka khasabka ah. Hindise-sharciyeedku faahfahiin kama bixin waxa noqon kara guurka khasabka ah, iyo sidoo kale, sida looga hortagi karo guurka khasabka ah.

Arrin la xiriirta oo ah guurka carruurta waxaa looga dooday qodobka 26-aad. Qodabkaan wuxuu sheegayaa in guurka carruurta shareecada islaamku oggoshahay, laakiin, waa in ninku sugaa ilaa iyo inta qofka dhallinta yar uu ka awoodi karo in uu sameeyo galmo. Waxaana khasab ah in uu ogaado suurtagalnimada xaaladda caafimad ee ka dhalan karta. Qodobkani wuxuu sheegayaa in aan lala sameyn karin galmo qof aan awoodin. Qofkasta oo xiriir galmo la sameeya qofkaas wuxuu masuul ka yahay dhaawaca, iyadoo loo fiirinayo shareecadana waxaa lagu ciqaabayaa karbaash/tacsiir.

Dhaqanka muxaafidka ah ee xooggan ee Soomaalida iyadoo la eegayo, hindise-sharciyeedku wuxuu ka fogaanayaa in uu magacdhabo da'da qofka noqon kara carruur marka la joogo guurka. Tani waxay Soomaalida dhexdeeda ka abuurtay doodo kulul. Axdiga Qaramada Midoobey ee xaquuqda carruurta wuxuu ku qeexay carruur qofkasta oo ka yar 18 sano. Sikastaba ha noqotee, dhaqanka Soomaaliyeed qaangaarnimada waxaa lagu cabiraa qaangaarnimada jinsi ee qofka sidaas daraaddeedd isku si looma wada arko. Gabdhaha laga bilaabo da'da 12 ama kasii yar ayaa loo arkaa qaangaarnimadooda. Hindise-sharciyeedku wuxuu leeyahay qeybo gaar ah (qodobbada 21-34) oo looga hadlayo danbiyada galmada ee ka dhanka ah carruurta.

Qodobka 19-aad ee hindse-sharciyeedka baarlamaanka wuxuu soo jeediyay qofkii lagu helo daandaansi galmo, in dhibbanaha lagula kacay uu ka codsan karo maxkamad amar fogeyn ah, haddii lagu xadgudbana waxaa dambiilaha lagu ciqaabayaa Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed. Hindise-sharciyeedku wuxuu daandaansi galmo ku qeexayaa marka qof si ula kac ah uu uga raadiyo galmo aan sharci ahayn qof kale, isagoo kaga faa'iideysanaya xaaladdiisa, sida in shaqo loosoo bandhigo, dallacsiin ama gaarsiinta wax qiimo leh qofka falka lagula kacay. Qodobku wuxuu daandaansi galmo ku timaamayaa isku dhawaansho xad-dhaaf ah, ka faa'iideysi jireed, iyo ku kadeedid faraxumayn jinsiyadeed taasoo sharci iyo akhlaaq ahaanba aan bannaaneyn.

Daandaansi galmo waxaa loo arkaa in uu yahay caqabad ka jirta goobo badan oo shaqo ee Soomaaliya. Shaqo la'aantu aad bay u sarreysaa dumar si daran u raadineysa shaqo ayaana la weyddiisan karaa galmo baddelkeedana la shaqaaleeyo. Daandaansi galmo wuxuu ka dhacaa goobaha qaar ay shaqaaluhu yihiin dumar ayagoo la weyddiisan karo in galmo lala sameeyo si mushaarka loogu kordhiyo. Dhacdooyin badan oo sidan oo kale ahna dhibanuhu ma sheego.

Si looga jawaabo cabaqadaha soo ifbaaxaya ee la xiriira internet-ka iyo isticmaalka baraha bulshada oo batay, qodobka 23-aad wuxuu mamnuucayaa faafinta muuqallada, sawirrada galmeed noocay doonaan ha ahaadeen ee baraha bulshada. Qofkasta oo lagu helo gelidda danbigaan waxaa lagu ciqaabayaa iyadoo loo eegayo shareecada islaamka 80 karbaash, waxaana looga baahan yahay bixinta magdhawga dhaawaca nafsadeed iyo midka mooral ee dhibbanaha. Qofkasta oo baahiya cod qofeed, filim, sawir la qaadey ama la duubay inta lagu guda jiro galmo waa dambiile isku day dil sharcidarro ah dhaqanka iyo caadada Soomaaliyeedna waa wax kasoo horjeeda. Waxaana lagu ciqaabaya si waafaqsan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

### Baaritaannada iyo cadeymaha damiyada ciqaabta

Qodobka 27-aad wuxuu sheegayaa in Ciidanka Booliska Soomaaliyeed iyo xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud ay masuul ka yihiin baarisyada falalka kusfiga ah. Masuuliyadda dicaafaacidda dhibanayaasha waxaa la siiyay ciidanka booliska, xaafiiska xeer ilaaliyaha guud iyo dowladaha hoose ee maamula halka ay dhacdadu ka dhacdey. Waxaa intaa dheer, qodobka 29-aad wuxuu ku darayaa cidkasta oo dayacda ilaalinta dhibbanaha ama ku guuldarraysta inuu soo tabiyo dambi galmeed, waxaa lagu ciqaabayaa si waafaqsan Xeerka Ciqaabta Soomaliyeed.

Qodobka 35-aad wuxuu qorayaa caddaymaha loo baahan yahay si loogu aqoonsado kiiska mid kufsi.

a) Warbixinno ka yimaada dhakhtar la aqoonsan yahay, kuna taqaqusay qiimeynta caafimaadka kaasoo diyaarinaya warbixin dhammeystiran oo ku saabsan heerka uu dhaawaca dhibbanaha gaarsiisan yahay.

b) Dhaarin iyo markhaati lagu kalsoon yahay oo joogay halkii dhibku ka dhacay.

c) Caddeymaha dambi barista booliska iyagoo adeegsanaya baaritaanno xirfadeysan.

Xaaladaha damiiblaha u horseedi kara xukun adag waxaa kamid ah:

a) Xiriirka bulsheed ee ka dhexeeya dhibbanaha iyo eedaysanaha

b) Maqaamka eedeysanaha ama masuuliyadda bulsheed ee uu hayay iyo nuglaanta dhibbanaha.

c) Xirfadda ama farsamada uu u adeegsaday eedaysanuhu dhibbanaha.

d) Adeegsi (dheeraadka ah) ee rabshadeed inta lagu guda jiray dambiga galmada.

## Isbarbardhig iyo falanqeyn labada hindise-sharciyeed

Waxaa jira waxyaabo ay isaga mid yihiin labada hindise-sharciyeed ee Hindishe-sharciyeedka Dembiyada Jinsiga 2018 iyo Hindise Sharciyeedka Galmada iyo Dembiyada la xiriira ee Baarlamaanku sameeyay. Waxyaabahaas waxaa kamid ah:

1. Dembiyada galmada ee looga hadlay labada hindise-shariciyeed waa isku mid: kufsiga, kufsiga kooxeed, ka faa'iideysiga galmo, guurka qasabka ah, guurka caruurta, daandaansi galmo, afduub galmo, adoonsi galmo, galmada dalxiiska, sumeynta ku talagalka ah, heysashada sharci darada ah ee galmo iyo ujeeddooyin addoonsi la xariirta iyo dembiyada galmada ee la xiriira tikniyoolajiyadda iyo warbaahinta bulshada.

2. Hindise-sharciyeedyadu midkoodna ma qeexayo qofka loo aqoonsanayo caruur marka loo eego dembiga galmada. Inkastoo Hindise-sharciyeedka Dembiyada Galmada lagu ciqaabayo kuwa dembi galmo ka gala caruurta ka yar 11-ka sano illaa xabsi daa'in, ma qeexayo xadka da'da caruurta. Sidoo kale, hindise-sharciyeedka baarlamaanka ayaan ka hadlin qeexitaanka caruurta.

Dhinaca kale, waxa jira xoogaa farqi u dhexeeya labada hindise-sharciyeed, oo ay kamid yihiin:

1. Qeexitaanka kufsiga ayaa ku kala duwan labada hindise-sharciyeed. Qeexitaanka kufsiga ee Qodobka 4-aad ee Hindise-sharciyeedka Dembiyada Jinsiga waa "wax kasta oo si ula kac ah loo geliyo duleellada jirka (xubnaha taranka ama gadaal) iyadoo la adeegsanayo xubnaha taranka ama wax kale." Erey bixintu waxay abuurtay dood kulul oo ka dhex dhacday baarlamaanka waxayna dhiirrigelisay faafitaanka aragti taban oo ku aaddan hindise-sharciyeedka. Tani waxaa laga yaabaa inay dhiirrigelisay soo qorista hindise-sharciyeed dib-u-eegis lagu sameeyay oo ay soo diyaariyeen guddi baarlamaan.

2. Farqiga u dhexeeyaa si faahfaahsan wuxuu uga muuqdaa tirada qodobada ku jira labada hindise-sharciyeed. Hindise-sharciyeedka Dembiyada Jinsigu wuxuu ka kooban yahay sagaal qeybood iyo 63 qodob, halka hindise-sharciyeedka baarlamaanka uu ka kooban yahay lix qeybood iyo 39 qodob. Hindise-sharciyeedka hore waxaa ku jira 24 qodob oo dheeri ah sidaas awgeedna wuxuu taabanayaa arrimo badan oo taagan iyo xaalado dhici kara.

3. Hindise-sharciyeedka Dembiyada Jinsiga wuxuu qeyb gaar ah (Qodobbada 21-34) uga hadlayaa dembiyada galmada ee ka dhanka ah carruurta, isagoo ka hadlaya dhammaan dembiyada galmada sida ay u khuseeyaan carruurta. Hindise-sharcigiyeedka baarlamaanka wuxuu Qodobka 26-aad keliya kaga hadlayaa dembiyada galmada ee la xiriira caruurta.

4. Inkastoo Hindise-sharciyeedka Dembiyada Jinsiga uu qeexayo sannadaha xarig ee lagu dabaqi karo fal kasta oo galmo ah, hindise-sharciyeedka baarlamaanku wuxuu tixraacayaa Shareecada Islaamka iyo Xeerka Ciqaabta Soomaaliya wixii ciqaab ah iyadoo aan la sheegin ciqaabta. Farqigaani wuxuu ka imaan karaa aqoonta dadka qoray labada sharci. Sida uu sheegay afhayeenka baarlamaanku, hindise-sharciyeedka lasoo gudbiyay bishii siddeedaad ee sanadka 2020 waxaa iska kaashaday xildhibaannada iyo qaar kamid ah culimada Soomaaliyeed. Tani waxay fasiraad u noqon kartaa sababta Shareecada iyo Xeerka Ciqaabta Soomaaliya loogu laabanaayo dhammaan ciqaabta la xiriira dembiyada galmada ee ku jira hindise-sharciyeedka uu soo diyaariyay baarlamaanku.

5. Xuquuqda dhibbanayaasha iyo eedeysanayaasha, baaritaannada, iyo doorka hey'adaha baaritaanka ayaa ku kala duwan labada hindise-sharciyeed. Hindise-sharciyeedka Dembiyada Jinsiga wuxuu si faahfaahsan uga hadlayaa (17 qodob) doorka iyo waajibaadka Ciidanka Booliska, Xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud, iyo nidaamka garsoorka ee maxkamadaha, iyo sidoo kale xuquuqda dhibanayaasha, markhaatiyada, iyo eedeysanayaasha. Dhinaca kale, hindise-sharciyeedka baarlamaanka ayaa sheegaya in mas'uuliyadda ilaalinta dhibbanayaasha la siiyay Ciidamada Booliska, Xeer ilaaliyaha Guud, iyo dowladda hoose ee maamusha goobta. Sikastaba ha noqotee, hindise-sharciyeedka dambe ayaa sidoo kale tiriyay caddeynta loo baahan yahay si kiis loogu tiriyo kufsi, sida warbixinno dhakhtar, markhaatiyo la aqbali karo, iyo natiijooyinka baaritaanka booliiska. Hindise-sharciyeedka koowaad si gaar ah uma sheegayo caddeymaha loo baahan yahay. Sikastaba ha noqotee, shuruudaha caddeymaha ee hindise-sharciyeedka baarlamaanka ayaa ah mid dhibaato leh: tusaale ahaan, kufsi aan markhaati lahayn maxkamad lama horkeeni karo.

6. Hindise-sharciyeedka Dembiyada Jinsiga wuxuu ku ciqaabayaa kuwa kufsiga geysta 10-15 sano oo xarig ah. Ciqaabta kufsiga ee ku xusan hindise-sharciyeedka baarlamaanka ma cadda. Hindise-sharciyeedka dambe wuxuu keliya sheegayaa in ciqaabta la kordhin doono haddii dhibanaha kufsiga loo geystay uusan fayoobayn, naafo yahay / nugul yahay, ama caruur yahay.

## Talooyin tixgelin mudan

Sharci ku saabsan dambiyada galmada wuxuu noqon doonaa sharci muhiim ah oo ilaalinaya xuquuqda dhibbanayaasha xadgudubyada galmada ee Soomaaliya islamarkaana ka hortaga dambiyada noocaas ah. Talooyinka soo socda ayaa la tixgelin karaa.

1. Wasaaradda Haweenka iyo Xuquuqul Insaanka iyo Baarlamaanku way wada fadhiisan karaan waxayna sameyn karaan dib-u-eegis taxaddar leh si loo ogaado qodobbada hindise-sharciyeed kasta ee muhiimka ah iyo in mustaqbalka la mideeyo labada hindise-sharci. Nuxurka labada hinidse-sharciyeed, gaar ahaan dambiyada galmada, waa isku mid, inkastoo tafaasiishu kala duwan tahay. Iswaafajinta labada hindise-sharci iyadoo loo xilsaarayo khubaro xagga sharciga ah iyo in laga qeyb geliyo bulshada rayidka inta lagu gudajiro hannaanka iswaafajinta waxay soo saari kartaa hal hindise-sharci oo leh faahfaahinta lagama maarmaanka ah, aqbalaadda iyo aragtida saamileyda muhiimka ah oo ay ku jiraan hoggaamiyeyaasha diinta, kuna habboon mabaadi'da diinta Islaamka ee dambiyada la xiriira galmada iyo iyadoo la tixgelinayo qiyamka iyo xeerarka dhaqanka Soomaalida.

2. Fahamka dadweynaha ee baaxadda iyo nuxurka labadaba hindise-sharci ee ku saabsan dembiyada galmada ma xooggana. Xasaasiyad ayaa si sahal ah loo kiciyey oo buuqa dadweynaha ayaa meesha ka saaray dooddii wax ku oolka ahayd. Waxaa loo baahan yahay olole ballaaran oo wacyigelin ah oo ku saabsan arrimaha muhiimka ah ee ku lugta leh sameynta sharciga dembiyada jinsiga. Waxaa muhiim ah in la kordhiyo wacyiga dadka jaangooya siyaasada iyo kuwa ku howlan, iyo sidoo kale in laga qeyb geliyo bulshada doodaha ku saabsan halista dambiyada noocan oo kale ah, si loo gaaro aqbalaad ballaaran taasoo keeni karta yareynta xadgudubyada galmada ee loo geysto haweenka iyo gabdhaha Soomaaliyeed. Howsha wacyigelinta waxaa lagu hormarin karaa iyadoo la tixraacayo guddiga lasoo jeediyay ee Jinsiga iyo Xadgudubka Jinsiga, kaasoo ka hoos shaqeyn doona Guddiga Xuquuqda Aadanaha sida ku xusan qodobka 111B ee dastuurka KMG ah ee Soomaaliya.

3. Xeerka Ciqaabta Soomaaliya ee 1962 waxaa ku jira qodobo u baahan in la waafajiyo hindise-sharciyeedka dambiyada galmada. Dib-u-eegista iyo cusbooneysiinta Xeerka Ciqaabta Soomaaliya (oo la diyaariyay horaantii 1960-yadii) oo ay ku jiraan ciqaabtiisa iyo arrimaha la xiriira dembiyada galmada iyo hababka kale ee dambiyada ayaa muhiim ah.

4. Baaritaan sax ah iyo ciqaabta dambiilayaasha geysta xadgudubyada galmada suuragal ma ahan haddii aanan la helin booliis karti iyo xirfad leh, adeegga dacwad-oogista, iyo garsoor. Awoodda (iyo helitaanka) garsoorka iyo saraakiisha dacwad oogista, iyo sidoo kale booliska loo igmaday inay baaraan dambiyada, ayaa aasaas u ah fulinta sharciyada khuseeya dembiyada galmada. Xoojinta hay'adahaan waa in mudnaan la siiyaa si loo hubiyo hannaan sax ah oo leh dhageysi caddaalad ah iyo fulinta go'aamada maxkamadda.

5. Guurka qasabka ah waxaa lagu yareyn karaa iyadoo kor loo qaadayo wacyiga iyo aqoonta bulshada si ay u fahmaan rabitaanka xorta ah iyo doorashada qof ahaaneed, iyo fulinta ciqaabta dambiyada guurka qasabka ah iyo kuwa geysta.

***Soo saarista falanqeyntan iyo doodaha dadweynaha la xiriira waxaa taageeray International Media support (IMS) & Interpeace.***